



# How to give feedback Waxaanu qiimaynaa Aragtidaada

Somali

Unuga Adeega Macliimalaha

**Waxaan halkan u joognaa in aan ku dhegaysano.**

Bukaan, daryeelle ama booqde ahaan, wax ka dhihidaadu waa muhiim sababtoo ah waxay u ogolaataa dumarka iyo Adeega Caafimaadka Ilmaha-dhashay (WNHS) inay ogaadaan waxa si fiican u shaqaynaya iyo wixii la sii wanaajin karo. Unuga Adeega Macmiilaha (CSU) waa adeeg aad leedahay oo noo sheega waxaad filayso.

Haddii aad dareemayso in daryeelkaagu uu aad uga sareeyo waxaad filaysay fadlan noo sheeg si aan shaqaalaha ku daryeelayey ugu sheegno inay ogaadaan inay shaqo fiican qabteen.

U sheegida shaqaalaha arrimuhu markay soo baxaan ayaa badanaa xalin kara. Haddii aad u baahan tahay caawima intaas ka badan oo arrintaan ah waxaad la xiriiri kartaa CSU.

Dacwaduhu waa qarsoodi in laga hadlana saamayn ku yeellan mayso daryeelkaaga hadda iyo mustaqbilka. Ma jiro waqti u xadadan inaad nagala xiriirto waxaad qabto.

**Siyaallaha aad noogu sheegi karto waxaad rabto**

- ▶ La hadal shaqaalaha ku daryeellaya
- ▶ Buuxi foomka mahadcelinta iyo aragti dhiibashada kaas oo laga helli karo meesha uu yaal sanduukha aragti dhiibashada.
- ▶ Toos ula xiriir CSU  
Unuga adeega Macmiilaha  
King Edward Memorial Hospital  
PO Box 134  
Subiaco WA 6008  
Telephone: (08) 6458 1444  
Email: [WNHSCLS@health.wa.gov.au](mailto:WNHSCLS@health.wa.gov.au)  
[www.wnhs.health.wa.gov.au/Feedback](http://www.wnhs.health.wa.gov.au/Feedback)  
Online at: [kemh.health.wa.gov.au](http://kemh.health.wa.gov.au)

Saacadaha shaqadu waa Isniinta ilaa Jimacaha 8:30 subaxii ilaa 4:30 galabtii.

## Haddii doorbidayso kaalmo dibada ah la hadal shaqaalaha daryeelkaaga.

- ▶ Golaha Macmiilaha Caafimaadka ee WA (inc) 9221 3422 ama wicid lacag la'aana oo ah 1800 620 780.
- ▶ Daryeelayaasha WA 1300 227 377
- ▶ (Perth) ama wicid lacag la'aana oo ah 1800 193 331 (wixii caasumada baxsan)

Haddii aadan ku faraxsanayn natiijada dacwadaada, waxaad la xiriiri kartaa Xafiiska Dacwadaha Adeegyada linta iyo Caafimaadka (HaDSCO) oo ah 6551 7600 ama wicid lacag la'aana 1800 813 583 (wixii caasumada ka baxsan).

Xafiiskani wuxuu baari karaa arrimaha dhacay labadii sano oo ugu dambaysay.

WNHS waxay raacaysaa Jaartarka Isbitaalka Bukaanka Dadweynaha ee Galbeedka Australia.

## Xuquuqda Bukaanaada Isbitaalada Dadweynaha ee Western Australia waxana ka mid ah:

- ▶ Doorashada inaad hesho adeeg isbitaal dadweyne oo lacag la'aana
- ▶ Helitaanka daaweyn ku salaysan baahida caafimaadkaaga
- ▶ Suurtagalnimada adeegyo isbitaal dadweyne oo kala duwan
- ▶ Suurtagalnimada afceliye
- ▶ Rabitaanka diidmada inaad ka qaybgasho tababarka iyo cilmi baarista
- ▶ In laguula dhaqmo si ixtiraam, qadarin iyo gaarnimo leh
- ▶ Rabitaanka inuu kula socdo daryeelle ama qof ku kaalmaynaya.
- ▶ Helitaanka daryeel caafimaad oo taya sarre leh oo amaan ah
- ▶ Helitaanka sharaxaad waadax ah iyo dhamaan daryeelka iyo khatarta
- ▶ Xalka ah inaad raadiso aragti kaleeto
- ▶ In lagu sheego wixii khuseeya sii wadida daryeelka inta aadan isbitaalka ka bixin
- ▶ Helitaanka diiwaanada caafimaadka adoo maraya Freedom of Information Act 1992, iyo
- ▶ Awooda ka mahadcelinta, faallada ama ka dacwoodka wixii khuseeya daryeelka aad heshay

Waxaa waajiba inaad ogaato xuquuqdaada si aad u hesho adeeg leh amaan, daryeel iyo tayo wanaagsan, sida lagu sheegay Jaartarka Bukaanka Isbitaalka Dadweynaha WA. Si aad u aragto iyada oo online ah booqo [www.healthywa.gov.au](http://www.healthywa.gov.au)

## Bukaanada ayaa leh mudnaanta kowaad

Bukaanada iyo daryeelayaasha ayaa ah muhiima si ay u qaataan doorka bixinta daryeelka caafimaadka.

Waxaanu kaloo leenahay Golaha Talabixinta Bulshada oo firfircoon. Weydiiso xaashida macluumaadka ama la xiriir unuga Adeega Macmiilaha wixii macluumaad ah oo intaas ka badan iyo inaad rayigaaga ka dhiibato adeega.

Dukumintigaan waxaa lagu helli karaa qaab kale haddaad codsato qofkii iin leh



**Women and Newborn Health Service**  
King Edward Memorial Hospital  
374 Bagot Road Subiaco WA 6008  
**Telephone:** (08) 6458 2222  
**Web:** [www.wnhs.health.wa.gov.au](http://www.wnhs.health.wa.gov.au)

Waxaa daabacay Unuga Adeega Macmiilaha

© North Metropolitan Health Service 2020